

Oman äidinkielen merkitys toisen kielen oppimisessa: somali

Ahmiyada luqadda hooyo iyo barashada luqad kale

Maxey luqaddaada hooyo barashadeedu muhiim u tahay?

Waa muhiim in ardeygu luqaddiisa hooyo si wanaagsan u garanayo, waayo luqadda hooyo waa aasaaska fikirka iyo dareenka ilmaha. Sidoo kale luqadda hooyo waa shay muhiim u ah, ha noqoto luqad cusub barashadeed, aqoon kororsi iyo hanasho intaba.

Ma suurto gal baa in ardeygu uu si wanaagsan u barto labo luqadood iyo in ka badanba?

Ilmuhu wuxuu awoodaa in uu si wanaagsan u barto laba luqadood iyo in ka badanba, haddii aan u suurto galino.

Luqaddee ayaa wanaagsan in ay waalidku kula hadlaan caruurtooda?

Waa in ay waalidku mar waliba kula hadlaan caruurta luqaddooda hooyo. Haddii ay waalidku ku hadlaan luqado kala duwan, waa in mid waliba uu kula hadlaa caruurta luqaddiisa hooyo.

Ma baranayaan ilmuhu luqadda finishka, haddii ay waalidku ku hadlaan luqaddooda hooyo?

Ilmuhu waxa uu ka baranayaa finishka xanaanada, iskuulka diyaarinta, iskuulka iyo waliba saaxiibadiis. Haddii uu ilmuhu garanayo erayada iyo fikradda guud oo uu ku garanayo luqaddiisa hooyo, waxaa u sahlan in uu ku garto luqaddiisa hooyo, waayo waxaa diyaar u ah aqoon hoose oo luqaddiisa hooyo ah.

Sidee ayey waalidku u caawin karaan ilmahoodu si ay luqaddooda hooyo u kobacdo?

Waxaa loo caawin karaa in ilmuhu luqaddiisa hooyo kobacdo, in mar waliba uu waalidku kula hadlo ilmaha luqaddiisa hooyo. Waxaa intaa dheeri ku ah in ay ka qayb galaan barashada luqaddooda hooyo. Waxaa kale oo caawinaya luqadda hooyo in ay kobacdo in uu guriga mowqif dhab ah ka qaato luqadda hooyo isticmaalka.

Ma khasab baa in ilmuhu ka qayb galo barashada luqaddiisa hooyo?

Waxaa lagama maarmaan ah in laga qayb galo barashada luqadda hooyo dhawr arimood daraadood: Luqadda hooyo barashadeeda waxey caawineysaa ardeyga fikirkiisa, isticmaalkiisa xirfada luqadda, in uu dareenkiisa ku cabiro, waxey kor u qaadeysaa xiriirkiisa dadka kale iyo dabeecadiisaba. Luqada hooyo waxey hormarinaysaa oo kale awooda waxbarasho, waxeyna wanaajinaysaa in ardeygu uu ku guuleysto waxbarashadiisa.

Sidee ayey waalidku uga caawin karaan ilmahooda barashada luqadda finishka?

Luqad kale barashadeedu wey sahlan tahay, haddii uu ilmuhu si wanaagsan u garanayo luqaddiisa hooyo. Luqadda finishka barashadeeda waxaa loo caawin karaa in siyaabo kala duwan loogu isticmaalo guriga luqadda hooyo. Luqadda finishka waxaa suurto gal ah in uu ilmuhu ku barto iskuulka, saaxiibadiis, hiwaayada dhexdeeda iyo naadiyada. Iskuulka waxaa lagu baraa ardeyga luqadda finishka ee loogu tala galey dadka aan finishka aheyn, waxaana uu wadayaa ilaa uu ardeygu luqaddiisa ay la mid noqoto dadka luqada u dhashay oo kale. Guriga oo mowqif dhab ah ka qaato luqadda finishka barashadeeda, waxa ay ka caawineysaa ilmaha in uu luqad kale barto.

Buug warbixineedka xarunta waxbarashada ee la soo gaabiyey waa luqaddaada – caqligaada. Wuxuu kugu hagayaa in uu kaa caawiyo luqaddaada hooyo barashadeeda.